



# Biyaha Ceelka iyo Ilmahaaga

## Sida loo baaro

Badqabka iyo baarista ceelkaaga biyaha adiga ayaa mas'uul ka ah mar kasta. Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) waxay ku talinaysaa in aad baarista biyahaaga u adeegsato shaybaar shahaado haysta. Waydii waaxda bay'adda iyo adeegga caafimaadka tilmaamaha la raaco ee ku saabsan adeegga baarista ceelasha iyo agabka muunada ee loo baahan yahay. Shaybaarka ayaa ka jawaabi kara su'aalaha la xidhiidha sida muunada loo qaado, qiimaha iyo waqtiga ay qaadnayso helitaanka natijada.

[Shaybaarada la aqoonsan yahay ee ku yaal Minnesota ayaa muunaada ka aqblaya Mulkiilayaasha Ceelasha Gaarka loo Leeyahay \(PDF\)](http://www.health.state.mn.us/communities/minnesota/yaqaansan/yaqaansan_yahay_e_e_ku_yaal_minnesota_ayaa_muunaada_kaa_aqblaya_mulkiilayaasha_ceelasha_gaarka_loo_leeyahay.pdf)

([www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/labmap.pdf](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/labmap.pdf))

## Maxaa Xiga?

Tillaabooyinka aad qaadi kartid haddii ay biyahaagu wasakhaysan yihiin tayadadooduna aysan ahayn heerkii la doonayay oo wax badan ka baro arrimahan.

[Baarista Ceelka, Natijada iyo kala doorashada](http://www.health.state.mn.us/welltesting)

([www.health.state.mn.us/welltesting](http://www.health.state.mn.us/welltesting))

Inta badan wasakhda waxaa lagu yarayn karaa daaweynta biyaha guriga oo si fiican loo hagaajiyo.

[Xaanshida Xaqiiqda ee Daaweynta Biyaha Guriga](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/factsheet/hometreatment.html)

([www.health.state.mn.us/communities/environment/water/factsheet/hometreatment.html](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/factsheet/hometreatment.html))

## Khayraadka

[Buugga Gacanyaraha Mulkiilaha Ceelka: Hagaha Macmiilka Ceelasha Biyaha ee Minnesota \(PDF\)](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/construction/handbook.pdf)

([www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/construction/handbook.pdf](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/construction/handbook.pdf))

[Daabaco ama dalbo buug-yarahaan onlaynka ah](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/safebaby.html)

(eeg qaybta xiisaha leh ee bogga shabakadda) [Biyaha Badqabka leh ee Ilmahaagu u baahan yahay](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/safebaby.html)

([www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/safebaby.html](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/safebaby.html))



## La xidhiidh

Minnesota Department of Health  
625 Robert Street North  
P.O. Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-4600 or 800-383-9808  
[health.privatewells@state.mn.us](mailto:health.privatewells@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us/wells](http://www.health.state.mn.us/wells)

To obtain this information in a different format contact:  
651-201-4600.

Updated: 12/2024

Printed on recycled paper.

Business\_Operations\Communication\_Information\Publications



## Baar biyaha ceelkaaga ka hor xilliga uurka ama inta lagu gudajiro

Baarista waa habka kaliya ee aad ku ogaan karto in ceelkaagu yahay mid badqab u leh ilmaahaga. Maadaama biyaha ceelasha Minnesota ay yihiin kuwa badqaba, haddana waxaa jiri kara ceelal wasakhaysan oo jirro u keeni kara ilmahaaga, sidoo kalana dhibaato ku ah kobacooda. Sida kaliya ee lagu ogaan karo in biyaha ceelkaagu ay badbaado u leeyihiin ilmahaaga waa in la baaro. Waxaanu qaadnaa tillaabooyin dheeri ah si aan u ilaalino dhallaanka ku nool guryaheena anagoo adeegsanayna hababka badbaadada sida armaajooyinka oo aan daboolno iyo meelaha korontada la gashado oo aan xafidno. Baarista ceelkaaga gaarka ah waa tallaabo kale oo sahlan oo lagu xaqiijinayo caafimaadka ilmahaaga!

## Ilmaha waxay halis weyn ugu jiraan waxyeelada biyaha wasakhaysan

Ilmuhu waxay cabbaan biyo ka badan cabbirkooda marka loo eego carruurta da' ahaan yara weyn iyo dadka waaweyn. Kobaca maskaxda iyo xubnaha kale ee ilmaha si fudud ayaa wax loogu dhimi karaa, jidhkooduna aad uguma ficna in uu ka takhaluso walxaha waxyeelada leh. Wasakhda qaarkood waxay sii martaa hooyada iyada oo u gudbi karta ilmaha xilliga ay hooyadu uurka leedahay.



Waa muhiim inaad baarto biyaha aad u isticmaasho cabbitaanka ama diyaarinta caanaha ilmaha. Tani waxay noqon kartaa biyaha tuubada ee ku yaal saxanka jikada iyo talaajadaada, nidaamka daawaynta oo leh tuubo gooni ah oo u dhow saxankaaga ama agabka biyaha sifeeya.

Baarista	Inta jeer	Saameynta caafimaad ay ku leedahay ilmaha	Waxa ay tahay in aad ka raadiso warbixinta shaybaadhka mg/L (milligrams litirkiiba) = ppm (qayb ahaan milyankiiba) µg/L (micrograms per litir) = ppb (qayb ahaan bilyankiiba)
<b>Bakteeriyada Coliform</b>	Sannad kasta	Bakteeriyada Coliform waxay muujin kartaa in jeermiska sida bakteeriyada, fayrasyada ama ku dulnoolaha ay ku jiri karaan biyahaaga. Kuwani waxay keeni karaan shuban, matag, calool maroojis, lallabbo, madax-xanuun, qandho iyo daal. Dhallaanka iyo carruurta waxay u badan tahay inay ku jirran karaan jeermiskan.	Heer kasta ayaa keeni kara waxyeello.
<b>Nitrate</b>	Sannad kasta	Maadada kiimikada ah ee Nitrate oo Heerarkeedu sareeyo waxay saameyn kartaa sida dhiiggu u qaado ogsijiinta, waxayna keenta xaalad caadi ahaan loo yaqaan 'blue baby syndrome' taasoo keeni karta jirro halis ah ama dhimasho. Dhallaanka dhalada lagu quudiyo ee da'doodu ka yar tahay lix bilood waxay halis ugu jiraan inay qaadaan cudurka buluugga ah ee ilmaha ku dhaca.	Heerka ka sarreeya 10 mg/L wuxuu keeni karaa waxyeello
<b>Lead</b>	Ugu yaraan hal mar	Macdanta Lead waxay dhaawici kartaa maskaxda, kelyaha iyo habdhiska neerfayaasha. Lead sidoo kale waxay hoos u dhigi kartaa horumarka dhanka waxbarashada, dhaqanka, waxayna carruurta u keentaa dhibaatooyin dhanka maqalka ah. Dhallaanka iyo carruurta da'doodu ka yar tahay lix sano iyo haweenka uurka leh ayaa khatar caafimaad oo aad u badan ugu jira maadada lead.	Heer kasta ayaa keeni kara waxyeello.
<b>Manganese</b>	Ugu yaraan hal mar	Heerarka sare ee maadada kiimikada ah ee manganese waxay sababi kartaa dhibaatooyin xaga xusuusta, dareenka iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa. Waxaa kale oo ay dhallaanka u keeni kartaa dhibaatooyinka waxbarashada iyo hab-dhaqanka.	Heerka ka sarreeya 100 µg/L wuxuu keeni karaa waxyeelo.
<b>Arsenic</b>	Ugu yaraan hal mar	Heerarka sare ee maadada kiimikada ah ee arsenic waxay ka qeyb qaadataa hoos u dhaca garaadka carruurta waxayna kordhisaa khatarta kansarka kaadiheysta, sambabada iyo beerka. Arsenic sidoo kale waxay kordhisaa khatarta sonkorowga, cudurrada wadnaha iyo dhibaatooyinka ku dhaca maqaarka.	Heer kasta wuxuu keeni karaa waxyeelo. Haddii heerku ka sarreeyo 10 µg/L, MDH waxay si adag ugu talinaysaa in la daweeyo biyaha ama la helo ilo kale oo biyo ah.
<b>Fluoride</b>	Ugu yaraan hal mar	Qadarka saxda ah ee fluoride wuxuu ka hortagaa suuska ilkaha gala. Fluoride aad u badan ayaa bedeli kara dhaldhalaalka iliggu leeyahay.	Heerka lagu taliyay waa 0.7 mg/L si loo ilaaliyo ilkaha. Dhakhtarka ilmaha ayaa hubin kara inay helayaan qaddarka saxda ah.